

Oggolaanshaha Barnaamijka Daryeelka Koriineed ee La Fidiyay Extended Foster Care Program Consent

Waxaan dooratay in aad qayb ka noqotid Barnaamijka Daryeelka Koriineed La Fidiyay. Inta aad ku jirtid Barnaamijka Daryeelka Koriineed ee La Fidiyay, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadkaaga iyo dadka kale ee ku lugta leh daryeelkaaga waxay u baahan yihiin in ay awood u yeeshaan in midba midka kale ay kala hadlaan caafimaadkaaga iyo/ama daryeelka caafimaadkaaga dhimirka. Waxay sidoo kale u baahan yihiin in ay la wadaagaan caafimaadkaaga iyo/ama xogta caafimaadkaaga dhimirka midba midka kale si ay kuu siiyaan daryeel wanaagsan. Haddii aadan saxiixin foomkan ama aadan doonaynin in aad ku jirtid Barnaamijka Daryeelka Koriineed ee La Fidiyay, waxaad wali awoodaysaa in aad heshid dheefo daryeel caafimaad inta aad u-qalantid Caynsanaanta Medicaid.

Haddii aad oggoshahay aadna saxiixdid foomkan, Qaybta Isku-duwidda Daryeelka Wanaagsanaanta ee Koriinka (FWB CCU) iyo shiriigyada lagu qortay liiska foomkan waxaa loo oggol yahay in ay helaan, arkaan, akhriyaan, nuqul ka sameeyaan, ayna la wadaagaan midba midka kale DHAMMAAN xogtaada caafimaad ee ay u baahan yihiin si ay kuugu caawiyaan maareynta daryeelkaaga. Xogta caafimaadka ee ay helaan, arkaan, akhriyaan, ay nuqul ka sameeyaan, ama ay wadaagaan waxaa laga yaabaa in ka soo bilaabatay kahor ama kadib taariikhda aad saxiixday foomkan. Diiwaanada caafimaadkaaga waxay lahaan karaan xog ku saabsan xanuuno ama dhaawacyo aad qabtay ama aad hore u qabi jirtay, natiijooyinka baaritaanka, sida raajitada, ama baaritaanada dhiigga; iyo daawooyinka aad hadda qaadaneysid ama aad hore u qaadatay. Diiwaanka caafimaadkaaga wuxuu sidoo kale lahaan karaa xog ku saabsan:

1. Barnaamijyada daroogo ama aalkolo isticmaalidda, ee aad hadda ku jirtid ama hore ugu jirtay;
2. Adeegyada qorshaynta qoyska sida xakamaynta dhalidda iyo ilmo ridista;
3. Cudurada la dhaxlo;
4. Cudurka dilaaga AIDS/Fayraska HIV;
5. Xaaladaha caafimaadka dhimirka; iyo/ama
6. Cudurada galmada la isaga gudbiyo (cudurada aad ka qaadi kartid galmoodka).

Xogtaada caafimaad waa mid khaas ah lamana siin karo dadka kale oggolaanshahaaga la'aantii ee hoos imaanaya xeerarka iyo sharciyada Mareykanka iyo Gobolka Washington. Shiriigyada haya xogtaada caafimaad ma siin karaan xogtaada caafimaad dadka kale haddii aad oggoshahay ama sharciga uu sheegayo in ay siin karaan xogta dadka kale mooyaane. Tani waa run haddii xogtaada caafimaad ay ku qoran tahay barnaamij kumbuyuutar ama warqad.

WAXAAN OGGOLAHAY in aan u oggolaado FWB CCU in ay helaan dhammaan xogtayda caafimaad shiriigyada lagu qoray liiska foomkan si ay iiga caawiyaan maareynta daryeelkayga, iyo si loo eego in aan ku jiro qorshaha daryeelka maareysan iyo dheefaha aan u-qalmo. Waxaan sidoo ale OGGOLAHAY in shiriigyada lagu qoray liiska ku yaala foomkan ay midba midka kale la wadaagi karaan xogta caafimaadkayga. Waxaan badeli karaa fikirkeyga waxaan dib ula noqon karaa oggolaanshaheyga wakhti kasta anigoo saxiixaya La Noqoshada Foomka Oggolaanshaha kadibna siinaya shaqaalaheyga bulshada ama FWB CCU. Tani ma saameynayso xog kastoo hore loo wadaagay.

Waxaan si gaar ah oggolaansho uga bixinayaa in xogtan soosocota la sheego:

XOGTA LA SHEEGAYO

XARAFYADA BILOWGA

- Diiwaanada natiijooyinka baaritaanka, oggaanshaha cudurada ama daaweynta aydhiska (HIV/AIDS) iyo Cudurada Galmada La Isaga Gudbiyo (RCW 70.24.105). _____
- Diiwaanada Caafimaadka Dhimirka (RCW 71.05.620) _____
- Diiwaanada Kiimiko Ku-tiirsanaanta (42 CFR Qaybta 2) _____

Sharciyada qaar waxay caymiyaan daryeelka fayruska HIV/Aydhis, diiwaanada caafimaadka dhimirka iyo isticmaalka aalkolo ama maandooriye. Shiriigyada isticmaala xogtaada caafimaad waa in ay u hoggaansamaan sharciyadan. Fadlan akhri dhammaan xogta ku qoran foomkan kahor inta aadan saxiixin.

Haddii aan aniga hore u buriyay mooyaane, xogta gaarka ah ee hor waxay ansax tahay ilaa _____
TAARIKHDA DHICITAANKA

MAGACA QORAN EE MACMILKA	TAARIKHDA DHALASHADA EE MACMILKA	
SAXIIXA MACMILKA AMA WAKIILKA SHARCIGGA AH EE MACMILKA	TAARIIKH	
MAGACA QORAN EE WAKIILKA SHARCIGGA AH	CILAAQADA WAKIILKA SHARCIGGA AH IYO MACMILKA	
LIIS KU QOR MAGACA SHIRIIGYADA KA QAYBQAADANAYA	TAARIIKH	XARAFKA HORE EE MACMILKA